

# Tallaallada COVID-19 iyo Uurka:



## Tallaalka COVID-19 ayaa lagula talinayaa dadka uurka leh

- Waxaan ognahay in dadka uurka leh ay halis sare ugu jiraan cudurka COVID-19 ee daran marka loo eego dadka aan uurka lahayn.
- Waxaa jira xog sii kordheysa oo ku saabsan badbaadada tallaalka COVID-19 xilliga uurka iyo sida wanaagsan ee tallaalku u anfaca dadka uurka leh.
- Tallaalku ma wax yeelleeyo uurka. Tan waxaa ku jira natiijooyinka saameeya ilmaha. Xogtu waxay muujinaysaa in faa'iidooyinka helitaanka tallaalka COVID-19 ay ka miisaan badan yihiin khatar kasta oo la yaqaan ama suurtagal ah ee tallaalka xilliga uurka.
- Haddii aad uur leedahay, is tallaal si uu kaaga ilaaliyo jirro daran oo COVID-19 ah.
- Kala hadal dhakhtarkaaga haddii aad su'aalo qabto.



## Dadka doonaya inay mustaqbalka dhalaan ilmo way qaatan karaan tallaalka COVID-19.

- Haddii aad hadda isku dayayso inaad uur yeelato ama aad doonayso inaad uur yeelato mustaqbalka, waxaa lagugula talinayaa inaad qaadato tallaalka COVID-19.
- Ma jirto wax caddaynaya in dhibaatooyinka dhalliinka ay yihiin waxyeello uu leeyahay tallaal kasta oo COVID-19 ah.

**mn** MINNESOTA

[mn.gov/vaccine](https://mn.gov/vaccine)